

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".



KEUZEWIJZER

VOOR

OKAN LEERLINGEN VAN 18

IN-Gent vzw in samenwerking met De Stap - Leerwinkel Oost-Vlaanderen

HAGEHA-XULASHADA

EE

ARDADA OKAN-KA DA'DA

KAWEYN 18

IN-Gent vzw oo kaashanaysa De Stap - Leerwinkel East Flanders

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

18 jir ma tahay?

Markaas wax-barashadu waajib kuguma aha*. Markaa hadda ka dib inaad iskuul aaddo waajib kuguma aha.

Waad dhigan kartaa waxbarashada dugsiga sare illaa dhamaadka sanad dugsiyeedka ilaa aad ka gareyso 25.

Waxaad sidoo kale u wareegi kartaa **dhabbaha waxbarashada dadka waaweyn**. Koorsooyinkan iyo tababbarrada dadka waaweyn, waxaad ku baranaysaa xirfad, waxaad ku qaadanaysaa shahaado ama waxaad u raacanaysaa waxbarashada hiwaayad ahaan.

Waxaa jira fursado badan.

Waad isku dari kartaa koorsooyinka badankood iyo tababbarrada

Buug-yarahan waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan waxa koorso ama tababbar uu ka kooban yahay, kharashaadku maxay yihiin iyo inta tababarku soconayo, maxaad kadib qaban karto, shahaadada aad qaadan toontid. Waxaad halkan ka heli doontaa macluumaad guud.

Ma u baahan tahay macluumaad dheeri ah? Eeg su'aasha ah "Ayaa i caawin kara" ee bogga 4.

Buug-yarahan waxaa laga heli karaa bogga internetkeenna **www..** Waxaa loo turjumay dhowr luqadood si uu kuu caawiyo. Iyada oo loo marayo noocyadan internetka waxaad aadi kartaa bogga aad u baahan tahay adiga oo hal mar gujinaya (click-garaynaya) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Guul iyo nasiib wacan!

***faah-faahinta waajibka wax-barashada:**

<https://www.vlaanderen.be/leerplicht-en-schoolplicht>

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

SHAXDATUSMADA

1. Su'aalahee ayaa muhiim ah? 4
2. Waa maxay Barnaamijka Isdhexgalka? 5
3. Waa maxay Parkoer? 6
4. Waa maxay tababar xirfadeed iyo wax-barasho dheeri ah? 7
5. Koorsooyinka Nederlands-ka ee jira waa kuwee? 8
6. Maxaan baran karaa si aan u gaaro horumarka shaqsiyadeed? 9
7. Macluumaad Faa'iido Leh 10

Qaar ka mid ah fursadaha wax-barasho

8. Shahaadada waxbarashada dugsigga sare iyada oo loo marayo Waxbarashada Sare ee Dadka Waaweyn (CVO) 11
9. Shahaadada waxbarashada dugsigga sare iyada oo loo marayo Guddiga Imtixaanka ee Dugsiga Sare 12
10. Tacliinta Sare: Barnaamijyada Qalin-jabinta 13
11. Tacliinta Sare: HBO5 kalkaalinta caafimaadka 14
12. Tacliinta Sare: Bachelor 15

1. Su'aalahee ayaa muhiim ah?

Maxaan xushaa?	Waxaa jira qalab bilaash ah oo kaa caawinaya xulashada wax-barasho ama xulashada xirfadaha (fiiri macluumaadka bogga 10). Hore ma u xulatay xirfad iyo / ama waxbarasho? Markaa xulo dugsi ama xarun tababar. Buug-yarahaan waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan fursadaha laga helo dhabhada (barnaamijyada) waxbarashada dadka waaweyn. Waad isku dari kartaa koorsooyinka badankood iyo tababarrada.
Muxuu ka kooban yahay tababarka / koorxada?	Waxaad helayaa macluumaad kusaabsan waxaad baranaysid iyo sida casharadda loo abaabulay. Waxaa jira koorsooyin u badan farsamada gacanta ama kuwo u badan aragtida-akhriska (theorie). Waxaad sidoo kale mararka qaarkood qaadan kartaa casharadda fiidkii. Talooyin: wixii macluumaad dheeri ah booqo bogga-internetka ee dugsiga, aad maalinta macluumaadka ama maalmaha booqashada furan, ballan sameeyso. Inta lagu jiro kulanka wada-hadalka iskuulka ama xarunta tababarka waxaad waydiin kartaa dhamaan macluumaadka aad u baahantahay.
Intee ayey socon doontaa?	Tani waxay kuxirantahay dhabbahaaga (traject) shaqsiyeed: inta qaybood (modules) eed qaadanayso, inay wax barasho maalmaha oo dhan ay tahay ama inay tahay wax-barasho habeenkii ah ... tacliinta sare, dhibcaha waxaa loo yaqaan dhicaha-wax-barasho (studiepunten): 60 dhibcaha-wax-barasho waa dhabbo-moodeel ah oo 1 sano ah. Isbarbar dhig muddada tababarka ee xarumaha tababarka iyo iskuulada kala duwan.
Tababarku muxuu diiradda saarayaa? Maxaan sameyn karaa ka dib?	Waxbarashadu waxay noqon kartaa u diyaargarowga waxbarasho dheeraad ah ama shaqo .
Ma lacag la'aan baa mise waa inaan lacag bixiyaa? Waa maxay kharashyada?	Badanaa waxa la bixiyaa khidmadaha diiwaangelinta, agabka-waxbarashada, qalabka-shaqada, dharka-shaqada, buugaagta.. Waxa kale oo jira koorsooyin iyo barnaamijyo bilaash ah sida Parkoer oo ka socda IN-Gent vzw (bogga 6), koorsooyinka VDAB (bogga 7) iyo CBE (Bogga 8-9). Talooyin: - Weydii qiimo dhimis-ta dadka heli kara. - Weydii su'aalo ku saabsan xirmada-koritaanka (groep pakket). Tani waa taageero dhaqaale oo loogu talagalay dhaliyarada da'doodu ka yar tahay 25 sano. Weydii inay kuu soconayso ama lagaa joojinayo xirmada-koritaanka. groeppakket.be
Maxay yihiin shuruudaha lagu gali karaa?	Kuwani waa: da'da, dukumiintiyada deganaanshaha, heerka luqadda, shuruudaha shahaadooyinka.
Shahaadadee ayaan qaadanayaa?	Waxaad heli doontaa warqad-caddeyn ah (attest), cadayn(qeyb ahaan) ((deel)certificaat), qaraal-cadayn ah (getuigschrift) ama shahaado (diploma).
Tirada ma ii galayaan waayo-aragnimadayda iyo wax-barashadayda dalkaygu ?	Khibradahaaga iyo wax-barashadaadu waxay ka ciyaaraan door muhiim ah. Mudo intee le'eg ayaad wax soo baratay? Maxaad baratay? Ma samaysay tababar shaqo ama ma leedahay khibrad shaqo? Ma qaadatay shahaadada / qoraalka-cadaynta waxbarashada dugsiga sare ee waddankaaga? Diyaarso cadaymahaaga iyo Shahaadooyinkaaga waddankaaga hooyo ama kuwa Biljam-ka. Talooyin: -mararka qaar waxaad aqoonsi u raadin kartaa shahaadada wadankaaga hooyo. Kadib waxaad heli doontaa dukumiinti isbarbardhigaya shahaadadaada iyo shahaadada Flemish-ka. Sidan ayaa cidda loo shaqeeyaa ku ogaanaysaa nooca shahaadada ee aad haysato. Waxaad ka dalban kartaa Naric Vlaanderen https://www.naricvlaanderen.be/erkenning-aanvragen-bij-naric-of-andere-instantie#onderwijsinstelling . Ma dagan tahay magaalada Gent? In-Gent vzw ayaa ku caawin karta.
Xageen wax ka baran karaa? Sideen ku helaa shahaado?	Waxaa jira koorsooyin loogu talagalay waxbarasho dheeraad ah. Waxaad ka heli doontaa macluumaad xiiso leh bogagga 11-15 iyo 5-10. Wax-barashada dugsiga sare sidoo kale waxaad ugu diyaar garoobaysaa wax-barashada tacliinta sare. Kadib waxaad raacaysaa jihada-u-sii-qulqulka-tacliinta sare (doorstroomrichting). Waxaad ku kobcin kartaa Nederlandskaaga inaad qaadata koorso NT2 ah (bogga.8).
Sideen ku heli karaa shaqo joogto ah?	Aqoon fiican oo luuqadda Nederlands-ka ah (Bogga 8) iyo tababar-xirfadeed (bogga 7) waxay kordhineysaa fursadahaaga ah inaad hesho shaqo rasmi ah. Sidoo kale Barnaamijka-isdhexgalka (bogga 5) ama Parkoer (Bogga 6) waxay noqon karaan kuwo ku anfaca. Waxaad ka heli doontaa macluumaad xiiso leh bogagga 9-10. Sidoo kale ma rabtaa inaad qaadata shahaado? Akhri bogagga 11-15.
Ayaa I caawin kara?	Tababarahaaga dabagalka ee Okan-ka ayaa kaa caawin doona inaad wax xulato.

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

Su'aalaha ku saabsan **tababarrada** iyo **koorsooyinka** waxaad u aadi kartaa **De Stap-Leerwinkel Oost-Vlaanderen**, info@destapgent.be , 09 233 75 15, gudaha maktabadda De Krook, dabaqa 2aad, Miriam Makebaplein 1, 9000 GENT. Waxaad sidoo kale heli doontaa hagitaan.



Su'aalaha la xiriira **isdhexgalka** koorsooyinka luuqadda **Nederlands-ka, Parkoer, tababarka dadka waaweyn iyo aqoonsiga-shahaadooyinka** waxaad la aadi kartaa **IN-Gent vzw**, info@in-gent.be , 09 265 78 40, Kongostraat 42, 9000 Gent. Waxaad sidoo kale heli doontaa hagitaan.



Ma deganid magaalada Gent? ? talo ka raadso bogga-interneetka ee is-dhexgalka: <https://www.integratie-inburgering.be/nl/landingspagina-inburgering>

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

2. Barnaamijka-isdhexgalku waa maxay?

<p>Nuxurka mawduuca</p>	<p>- Waxaad ka raacan kartaa barnaamijka wakaaladda isdhexgalka iyo is-dhexgalka-bulshada. (IN-Ghent oo ku taal Gent, Atlas oo ku taal Antwerp iyo hay'adda Flemish-ka ee ku taalla dhammaan magaaladyo kale iyo degmooyinka Flemish-ka).</p> <p>- Si aad u bilowdo, waxaad saxeexaysaa heshiiska-is-dhexgalka. Heshiiska waxaan isku dayeynaa inaan ku qeexno dhabbaha kugu habboon ee aad raacaysa.</p> <p>- Barnaamijka isdhexgalka wuxuu ka kooban yahay qaybo kala duwan wuxuuna ka koobnaan doonaa 4 qaybood laga bilaabo 1/01/2022.</p> <ul style="list-style-type: none"> - Koorsada Nederlandska (NT2 - heerka A1 iyo A2), - Koorsada wacyigelinta bulshada (maatschappelijke oriëntatie) (MO) ee ku baxaya afkaaga hooyo ama luqad kale oo aad taqaan, - Lataliye gaar kuu ah (lataliyaha dhabbada waxbarashada ayaa kaa caawin doona su'aalahaaga inta lagu jiro barnaamijka oo kuu gudbin doona VDAB. Waxaad sidoo kale dooran kartaa inaad sii wadato wax-barashada ama inaad dib u bilawdo wax-barashada.) - Waxaad dooraneysaa waxqabad aad ku baranayso dadka kale (asxaab in aad ku yeelato bulshada) ama aad si firfircoon uga qayb qaadato bulshada (kaqeyb-qaadashada(participatie)): waxaad dooraneysaa hiwaayad (isboorti, xiliga firaaqada), shaqo iskaa wax u qabso ah, tababar shaqo oo hordhac ah, waxaad la shaqeyn kartaa saaxiib kuu gaar ah (buddy) oo wax kula qabta (xiliyada firaaqada, xiliyada shaqada), <p>- Waxaad qaadan kartaa dhammaan qeybaha barnaamijka isla halmar. Waa lagaa dhaafi karaa qayb ka mid ah adoo adeegsanaya imtixaanka-ka-dhaaftaanka (MO ama NT2) ama sababtoo ah waxaad shaqeysaa ama waxbarataa waqti-buuxa (asxaab iyo kaqeybgal) (netwerk en participatie). - Casharada waxa la qaataa maalintii, fiidkii ama Sabtiyada.</p>
<p>Muddada</p>	<p>- waxay kuxirantahay dhabbahaaga shaqsiyeed. Waxaa lagu siin doonaa wakhtiga-bartilmaameedka bilowga heshiiskaaga. Muddadaasi waxay kuxirantahay muddada dhabbadaada luuqadda Nederlands-</p>
<p>Yooka</p>	<p>- Waxaad wax ka baraneysaa bulshada ku nool Flemish-ka iyo adeegyada ka jira magaalada ama gudeha Flemish-ka. Sidan ayaad si dhaqso ah ku dareemi doontaa inaad gurigaagi Beljam ah aad joogto. -Waxa lagu diyaarin doonaa inaad si firfircoon uga qaybqaadato bulshada. -Barnaamijka kadib waad sii wadan kartaa barashada Nederlands-ka, waxaad raacan kartaa koorso tababar xirfadeed, wax-barasho (intaa kadib ka fiiri macluumaad dheeri ah buug-yarahan).</p>
<p>Qiimaha</p>	<p>- Barnaamijka isdhexgalka waa lacag la'aan illaa iyo 31-ka Diseembar, 2021. - Laga bilaabo 2022 waa inaad bixisaa lacagta barnaamijka (360 euro dhabbada la maro oo dhan. Dhamaan macluumaadka waxtarka leh waxaa laga heli karaa bogga-internetka).</p>
<p>Shuruudaha Ogolaanshaha</p>	<p>- waan in aad jirtaa da'da 18 sano - waai naad ka diiwaan gashan tahay diiwaanka shisheeyaha ama diiwaanka dadweynaha (laga bilaabo 2022) - inaad ku jirto kooxda loo qoondeeyay isdhexgalka - Waxaa laga yaabaa in uu waajib kugu yahay in aad qaadato barnaamijka. Waxaad heli doontaa warqad. Markasta ka jawaab marka aad hesho warqad ku saabsan barnaamijka-is-dhexgalka. Kadib waxaan isla eegi doonaa fursadaha jira.</p>
<p>Shahaado</p>	<p>Waxaad heli doontaa warqadda-cadaynta-isdhexgalka (inburgeringsattest). Si aad taas u hesho, waa inaad ka gudubtaa dhammaan qaybaha-dhabbooyinka ku xusan heshiiskaaga. warqadda-cadaynta-isdhexgalka waxay cadeyn u tahay isdhexgalka bulshada (waxay lagama maarmaan u tahay in la helo dhalashada Beljamka).</p>
<p>Macluumaad Dheeraad ah</p>	<p>Waxaa jira barnaamij gaar ah oo loogu talagalay dhalinyarada: Parkoer (eeg faahfaahinta bogga 6). Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Isdhexgalka Bulshada: Fiidiyowyo ka marqaati kac ah: https://www.youtube.com/watch?v=8B-7MdFodbQ Is dhexgalka bulshada: https://www.integratie-inburgering.be/nl/landingspagina-inburgering Is dhexgalka bulshada Gent (met video in verschillende talen): https://www.in-gent.be/voor-jou/inburgeren IN-Gent vzw waxay sidoo kale ka caawisaa Reer-Gent: - is diiwaangelinta koorsada Nederlands-ka (NT2), (xitaa haddii aadan ku noolayn Gent, waxaad ku qaadan kartaa koorso Gent), - deeqaha waxbarasho ee UTC iyadoo loo eegayo shuruudaha qaarkood, - layliyada luuqadda Nederlands-ka, - imtixaan madani ah (hel caddayn aqoontaada luqadda Nederlands-ka), - aqoonsiga shahaadada, - In la helo iskuul loogu talagalay carruurta dhawaan timid Beljam-ka, - waxay kaa caawin doontaa inaad hesho daryeelka xanaanada ilmaha markaad bilowdo koorsada, - hagitaanka tacliinta sare, - kulanka iyo waqtiga firaaqada...</p>
<p>Caawin</p>	<p>- Ma dagan tahay magaalada Gent? La xiriir IN-Gent vzw, https://www.in-gent.be/, info@in-gent.be, 09 265 78 40, Kongostraat 42, 9000 Ghent.</p>

Vertaling Nederlands-Somali.


Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

- Ma ku nooshahay meel kale oo ka baxsan Flemish-kas? Talo ka raadi bogga-internetka ee Inburgering: https://www.integratie-inburgering.be/nl/landingspagina-inburgering
--

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

3. Waa maxay Parkoer

<p>Nuxurak Mawduuca</p> 	<p>- Waxaad qaadanaasaa koorsada wacyigalinta bulshada (maatschappelijke oriëntatie) (MO) oo loogu talagalay dhalinyarada. Wax badan ayaad ka baraneysaa Beljam-ka iyo Flamish-ka. Waxaad galaysaa safarro waxaadna baranaysaa saaxiibo cusub.</p> <p>- lataliye ayaa kaa caawin doona su'aalahaaga. Latalinta shaqsiyadeed ma istaageyso koorsada kadib oo xiriirka aad la leedahay lataliyahaaga ayaa kuu sii socon doona!</p> <p>- adoo maraya "Parkoer" waxaad ku biiri kartaa Barnaamijka-Isdhexgalka-Bulshada (eeg macluumaadka ku saabsan Barnaamijka-Isdhexgalka-Bulshada ee bogga 5).</p>
<p>Muddada</p>	<p>- 2 toddobaad inta lagu jiro xilliga fasaxa (fasaxa Paasvakantie-ga ama fasaxa xagaaga)</p>
<p>Yoolka</p>	<p>- Dhalinyaro kale ayaad wax labaranaysaa oo waxaad wax ka baraneysaa bulshada iyo adeegyada kala duwan. Taasi waxay kaa caawin doontaa nolashaada Beljam-ka.</p>
<p>Qiimaha</p>	<p>- waa lacag la'aan</p>
<p>Shuruudaha ogolaanshaha</p>	<p>- Waxaad jirtaa da'da inta u dhexeysa 17-19 sano waxaadna ka timid dal ka baxsan Midowga Yurub.</p> <p>- Magangalyo ma ka codsatay Beljam-ka oo jawaab maka sugaysaa? Markaas waxaa lagugu qori doonaa diiwaanka sugitaanka. Joogitaankaaga Beljam weli lama hubo. Wali laguuma ogola inaad qaadato barnaamijka-isdhexgalka, balse waxaad qaadana kartaa Parkoer.</p>
<p>Shahaadada</p>	<p>Waxaad heleysaa:</p> <p>-warqadda-cadaynta wacyigalinta-bulshada (attest maatschappelijke oriëntatie). Qayb ka mid ah Barnaamijkaaga-Isdhexgalka-Bulshada ah ayaa hadda aad ka soo baxday.</p> <p>Haddii aad sidoo kale qaadato heerka Nederlands-ka ee A2, waxaad heli doontaa Warqadda-Cadaynta-Isdhexgalka-Inburgering. Warqadda-Cadaynta-Isdhexgalka-Bulshada waxaa macquul ah inla qaato laga bilaabo da'da 18 sano.</p>
<p>Macluumaad dheeri ah</p>	<p>Parkoer parkoer@in-gent.be 0483 41 30 62 IN-Gent vzw, Kongostraat 42, 9000 Gent</p>

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

4. Waa maxay tababar-xirfadeed iyo wax-barasho-dheeri ah?

Nuxurka mawduuca	<ul style="list-style-type: none"> - Waxaad baraneysaa xirfad ama takhasus gaar ah si intaa ka dib aad u shaqeyso sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah. - Waxaad ka qaadanaasaa koorso tababar ah: <ul style="list-style-type: none"> - Centrum voor basiseducatie (CBE) Xarunta Waxbarashada Aasaasiga ah (CBE) - CVO (Centrum Volwassenen Onderwijs) CVO (Xarunta Waxbarashada Dadka Waaweyn),, - VDAB (Vlaamse Dienst voor Arbeidsbemiddeling en Beroepsopleiding) VDAB oo loogu talagalay dadka shaqo doonka ah (Adeegga Flemis-ka ee dhexdhexaadinta-shaqooyinka iyo tababarada xirfadaha), - Syntra, ... - Waxaad qaadanaasaa casharo maalintii iyo / ama fiidkii iyo / ama casharro adoo u maraya wax-barashada masaafada. (Ma xiisaynaasaa xirfadaha-dirayska-loo-xirto (uniformberoepen): dab-damiska, booliska, difaaca, duulimaadka? Waxaad macluumaad ka heli doontaa buug-yaraha 'Tallaabada xigmadda leh'('De wijze stap') https://www.destapgent.be/materialen/brochure_de-wijs-stap.php).
Muddada	Tababarku wuxuu socon karaa dhowr bilood illaa dhowr sano.
Yoolka	<ul style="list-style-type: none"> - Tababbarka kadib, waxaad fursad fiican u helayaa inaad hesho shaqo rasmi ah. Sida ugu dhakhsaha badan ee aad shaqo ku hesho waxay kuxirantahay qaybta iyo xirfada (ciriiriga ah) ((knelpunt)beroep). Macluumaad ahaan: shaqooyinka-ciriiriga (knelpuntberoepen) waa shaqooyin loo shaqeeyayaasha ay ku adagtahay inay helaan musharixiin ku habboon shaqada.
Qiimaha	<ul style="list-style-type: none"> - Dhammaan koorsooyinka VDAB waa u bilaash dadka shaqo raadiska ah. Waxaad sidoo kale qaadana kartaa koorso tacliin-ta sare ah (tusaale kalkaalinta caafimaadka (eeg bogga 14)) adoo adeegsanaya VDAB. Haddii aad qaadanaasoo koorso tababar ah oo ay aqoonsan tahay VDAB, waxa bixisa kharashka tababarka VDAB-da. - CVO waxaad ka heli kartaa qiimo dhimis, tusaale ahaan, haddii uu dakhligaagu hooseeyo. - Syntra tababar kasta isku qiimo kama aha. Ma dalban kartid qiimo dhimis.
Shuruudaha Ogolaanshaha	<ul style="list-style-type: none"> - dukumiintiyada degaanshaha - VDAB-da waa inaad 18 jir tahay oo aad haysataa heerka aasaasiga ee luuqadda Nederlands-ka si aad koorso u qaadana karto. Waxaad iska diiwaangelineysaa in aad shaqo raadis tahay. - CVO-da waxaad ka bilaabi kartaa tababarka xirfadaha laga bilaabo da'da 16 sano ama laga bilaabo 15 sano haddii aad horeyba u qaadatay laba sano oo waxbarasho dugsiga sare ah Tani balse waa fiidkii... maxaa yeelay weli waa inaad dhigataa dugsiga sare (wali wax-barashadu waa kugu waajib). Laga bilaabo da'da 18 sano kuma saarna waajibka wax-barasho oo waxaad qaadana kartaa casharo maalinta ah. Waa inaad marka hore Nederlands-ka sifiican ugu hadlayso oo aad fahamayso. - Waxbarashada Syntra waxaad ku bilaabi kartaa da'da 18 sano. Barnaamijyada waxbarasho qaarkood, waa inaad u haysataa shahaadada tacliin dugsiga sare ama aad ka gudubtaa imtixaanka ogolaanshaha ama nidaamka EVC / EVK.
Shahaadada	<ul style="list-style-type: none"> Waxaad heleysaa - warqad-cadayn ah(attest). Warqad (qayb ahaan)shahaado u dhiganta (deel)certificaat ama shahaado (diploma)
Macluumaad Dheeraad ah	<p>Marka lagu daro tababarka xirfadaha ee VDAB, waxaad sidoo kale baran doontaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> - Luuqadda Nederlands-ka (isu diyaarinaya xirfadaha), - sideen ku xushaa xirfad, - sideen ku heli karaa shaqo, <p>Adiga oo qaadaya dhabbada-OKOT ee VDAB waxaad heli kartaa shahaadada waxbarashada dugsiga sare ama tacliinta sare (koorsooyinka qalin-jabinta ama bachelor-ka xirfadeed), ama shahaadada se-n-se (dugsiga sare-kadib-dugsiga-sare). Booqo www.vdab.be/opleidingen Ku qor "OKOT" laynka raadinta.</p> <p>VDAB: https://www.vdab.be/anderstalig https://www.vdab.be/opleidingen</p> <p>VDAB in het Engels: https://www.vdab.be/english</p> <p>CVO: https://www.onderwijs.vlaanderen.be/nl/een-beroep-een-taal-of-ict-vaardigheden-aanleren</p> <p>Syntra Bartamaha-Vlaanderen: https://www.syntra-mvl.be/</p> <p>Guud ahaan:</p>

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

	Buugyaraha Tallaabada xigmadda leh (De wijze stap): https://www.destappgent.be/materialen/brochure_de-wiize-stap.php
Caawin	- ma qaadanaasaa Barnaamijka-Is-dhexgalka ama Parkoer , markaa IN-Gent vzw ayaa kaa caawin doonta (eeg macluumaadka bogga 5 iyo 6). - De Stap - Leerwinkel Oost-Vlaanderen www.destappgent.be - CVO, VDAB, Syntra

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

5. Koorsooyinka Nederlands-ka ee jira waa kuwee?

Nuxurka mawduuca	<p>- Nederlands-ku ma aha afkaaga hooyo balse waa afkaaga labaad. Taasi waa sababta aan uga hadalayno koorso NT2 ah (Nederlandska loogu talagalay dadka ku hadla luqadaha kale).</p> <p>- Nederlands-ka tallaabo tallaabo ayaad u baraneysaa. Waxaa jira dhawr heerar (niveaus), sida barashada alifbeetada (farta Latiin-ka), A1 (module 1.1), A2 (module 1.2), B1 (waxay kakooban tahay 4 module), B2 (module 3.2), C1 (module 4.2), C2.</p> <p>- Waxaa jira iskuulo / machadyo tababar oo kaladuwan oo abaabula koorsooyin sida CVO, CBE, Jaamacadda UCT, VDAB.</p> <p>- Casharrada waxa la qaataa maalintii, fiidkii, mararka qaarkoodna dhammaadka usbuuca, 3-4 saacadood maalintii.</p> <p>- IN-Gent vzw waxay kaa caawineysaa inaad hesho koorsada saxda ah. Waxaad gali doontaa imtixaan caqli-gal (logicatest) sidoo kale waxa suurto gal ah inaad gasho imtixaanka Nederlands-ka ee heerka-ogolaanshaha (instaptest). Waxaan sidoo kale kaa diiwaan gelin doonnaa koorsada ama waxaan kuu gudbin doonnaa dugsiga.</p>
Muddada	<p>-Muddada koorsadu way kala duwanaan kartaa. Koorso afar ama shan xilli leh usbuucii ayaa ka dhaqso badan koorso hal xilli cashar laqaato.</p> <p>Koorso A1 waxay socotaa 1 bil UCT-da, 3 bilood CVO-da iyo 1 sano CBE-da. Haddii aad marka hore barato alifbeetada, waxay kugu qaadaneysaa 2.5 sano inaad ku gaarto heerka koowaad (A1).</p>
Yoolka	<p>-Waxaad u baranaysaa luuqadda Nederlands-ka nolol maalmeedkaaga.</p> <p>- Macluumaad ahaan: haddii aad qaadato koorso Nederlands ah oo ka socota VDAB, waxaad baraneysaa Nederlands si aad shaqo u qabato. Si aad u bilawdid, waa inaad horeyba u taqaanay aasaas-ka luuqadda Nederlands-ka (eeg macluumaadka ku saabsan tababarka xirfadaha iyo tababar dheeraad ah ee VDAB bogga 7)</p>
Kharashka	<p>- Qiimaha iskuullada iyo koorsooyinkuba way ku kala duwan yihiin.</p> <p>- Iyada oo deeq waxbarasho ah ayaad qiimo jaban isaga diiwaan gelin kartaa UCT (Universitair Centrum voor Talenonderwijs) (Xarunta Jaamacadda ee Waxbarashada Luqadda).</p> <p>Weydii shaqaalaha inaad iska qori karto jaamacadda iyada oo qiime jaban ah.</p>
Shuruudaha Ogolaanshaha	<p>- Waxaad qaadan kartaa koorso NT2 ah laga bilaabo da'da 16 sano. Waxaad markaa isla qaadan kartaa casharrada NT2 iyo casharada iskuulkaaga.</p> <p>-dukumiintiyada degaanshaha</p> <p>Ma haysatid deggenaansho sharci ah? Fiiri suurta galnimada inaad Nederlands-ka barato adiga oo u maraya hagaha magaalada (Wegwijs in Gent) Gent: http://wegwijsingent.be/taal</p>
Shahaadada	<p>Waxaad heli doontaa warqad-cadayn ah (qayb ahaan) ((deel)certificaat) module-kiiba.</p>
Macluumaad Dheeraad ah	<p>Guudmarka Heerarka: https://www.in-gent.be/sites/default/files/overzicht%20niveaus%20NT2%20-%20Nieuwe%20ERK-berg.pdf</p> <p>Macluumaad-ka IN-Gent vzw: https://www.in-gent.be/voor-jou/nederlands/wil-je-nederlands-leren</p> <p>Sidoo kale waxaad ku samayn kartaa layli/ka baran kartaa Nederlandska waqtiga firaaqada: https://www.in-gent.be/voor-jou/nederlands/oefenen :</p>

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

	<ul style="list-style-type: none">- SaaxiibkaQalinka (isweydaarsiga e-maylka qof ku hadlas Nederladska),- Wadahadalka khadka tooska (online)ah (waxaad online-ka luuqadda Nederlands-ka layli kula samayn kartaa koox yar iyada oo kormeere ku hadla Nederlands-ka uu idin la joogo).- Inaad guriga Nederlands-ka ku tababarato (dhammaan noocyada tilmaamaha ee barnaamijyada iyo bogagga aad ku tababaran karto Nederlandska),- Goob-dadweyne, sheekada qaxwaha (kooxaha-hadalka meesha aad ku tababaran karto Nederlands-ka). Faahfaahin dheeraad ah bogga internetka https://in-gent.be/voor-jou/ontmoeting-en-vrije-tijd),- la socodka qof reer Gent-ah (Samen Gentenaar) (la soco qof-reer-Gent-ah, barashada Gent iyo isbarashada isla markaana intaas gudaheeda layli ku samaynta luuqadda Nederlands-kaaga). Faahfaahin dheeraad ah halkan https://in-gent.be/samen-gentenaar .
Caawin	IN-Gent vzw , info@in-gent.be , 09 265 78 40, Kongostraat 42, 9000 Gent.

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

6. Maxaan raacan karaa si aan horumar shaqsiyadeed u gaaro?

Nuxurka mawduuca	<p>- Horay waqti dheer maadan wax u soo baranin oo xiiso ahaan ma u rabtaa inaad wax u sii barato, shaqadaada, u diyaargarowga tababarka CVO (Xarunta Waxbarashada Dadka Waaweyn) ama u diyaargarowga imtixaanka qoraalka ee wadista baabuurta? Markaas waxaad casharro ka qaadan kartaa Xarunta Waxbarashada Aasaasiga ah (CBE)</p> <p>https://www.ligo.be/</p> <p>Waxaad ka baran kartaa: xisaabta, luqadda, bulshada, ICT, imtixaanka wadista baabuurta...</p> <p>- CVO (Xarunta Waxbarashada Dadka Waaweyn)</p> <p>https://data-onderwijs.vlaanderen.be/onderwijsaanbod/lijst?n=4&hz=true&hs=317+417&f=gent</p> <p>waad awooddaa: inaad wax ka barato ICT, aad baratid luuqad shisheeye (tusaale, Faransiis, Ingiriis, Polish, Isbaanish, Ruush, Carabi, Turki) inaad qaadata koorso sida harqaanka (tolmada dharka), alwaaxa, dubista aflaanta (rootiile aad noqoto),...</p> <p>- Haddii aad rabto inaad hal-abuur yeelato oo aad u horumarto farshaxan ahaan (tusaale ahaan Rinjiyeynta, Sawir-qaadista, Riwaayadda, fiyoolta, ...) waxaad casharro ku qaadan kartaa akadeemiyadda farshaxanka (hal-galin (Deeltijds) Wax-barashada-Farshaxanka (DKO))</p> <p>https://www.academiegent.be/</p> <p>- Haddii aad rabto inaad noqoto tababare isboorti, kormeeraha naashaadaadka isboortiga ama kaamamka, waxaad ku tababaran kartaa Dugsiga Tababbareha ee Flemish-ka (Vlaamse Trainersschool) https://www.sport.vlaanderen/trainers-en-sportbegeleiders/opleiden-en-bijtscholen/opleidingen/</p> <p>- Haddii aad rabto inaad raacdo waxqabad tababar oo gaaban (tusaale ahaan koorsada baraarujinta-maskaxda, samaynta-dhoobada, ku dhex socodka abuurka-deegaanka, ...), waxaad aadi kartaa dadaallada badan ee dhaqan-bulsheed-ka (het sociaal-cultureel) shaqada dadka waaweyn.</p> <p>Koorsooyin badan ayaa suurtagal ah, sidoo kale dadaallada gaarka loo leeyahay (privéinitiatieven).</p>
Muddada	- waxay kuxirantahay koorsada
Yoolka	- horumarinta shaqsiga
Kharasshka	- Mararka qaarkood koorsooyinku waa lacag la'aan (tusaale ahaan CBE). Waxa laga dhiibaa koorsooyinka inta badan khidmadda diiwaangelinta. Mararka qaar qiimo dhimis ayaa suurtagal ah.
Shuruudaha ogolaanshaha	-- laga bilaabo 18 sano - Badanaa waad ku biiri kartaa waxbarashada farshaxanimada halka-galin ah iyo CVO-ga waqti hore.
Shahaadada	Waxaad heleysaa - qoraal-cadayn ah(getuigschrift) warqad-cadayn ah(attest). Warqad (qayb ahaan)shahaado u dhiganta (deel)certificaat ama warqad cadayn u ah ka qaybgalkaaga, ...
Macluumaad dheeri ah	De Stap - Leerwinkel Oost-Vlaanderen: https://www.destagent.be/vol/persoonlijke-ontplooiing.php
Caawimo	De Stap - Leerwinkel Oost-Vlaanderen , info@destagent.be , 09 233 75 15, bibliotheek De Krook,

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

	dabaqa 2aad, Miriam Makebaplein 1, 9000 GENT.
--	---

	www.destappgent.be
--	--

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

7. Macluumaad wax ku ool ah

- **shaqo-iskaa-wax-u-qabso ah** si aad uhesho khibrad iyo si caawimaad aag u bixiso

Boosaska-Shaqooyinka: Iskaa-wax-u-qabso(Vacatures : Vrijwilligerswerk)

<https://eportfolio.vrijwilligerspunt.stad.gent/home>

- **shaqo-fasaxa** ama **shaqo-arday (vakantiejob of studentenjob)** si aad u kasbato lacag dheeraad ah

<https://stad.gent/nl/student-gent/werken-tijdens-je-studies/jobstudenten>

-Waxaa jira **qalab bilaash** ah oo kaa caawinaya **xulashada wax-barashada** ama **xulashada xirfadaha** oo aad ka heli karto Onderwijskiezer.be

<https://www.onderwijskiezer.be/v2/index.php>

Ama aad ka heli karto VDAB.be <https://www.vdab.be/>

Iyo

<https://www.vdab.be/welke-job-past-bij-me>

-Macluumaadka ku saabsan **shaqada-ardayga, laysanka darawalnimada, wax-barashada** iyo **mowduucyo** kale ayaa laga heli karaa bogga interneetka ee loogu talagalay **dhalinyarada** www.watwat.be

Kulannada, muusig-ga, isboorti-ga iyo waxqabadyo xiiso leh waqtigaaga firaaqada ah waxaad ka heli kartaa halkan:

[//participatiemarkt.in-gent.be](http://participatiemarkt.in-gent.be)

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

8. Qaado shahaadada tacliinta dugsiga sare adoo maraya Waxbarashada Dadka Waaweyn ee Sare (CVO)

<p>Nuxurka mawduuca</p>	<p>-Waxaad qaadanaasaa waxbarashada dugsiga sare ee Xarunta Waxbarashada Dadka Waaweyn (CVO) -Casharrada waxaa lagu abaabulaa qaybo (modules). -Waxaad qaadanaasaa casharo maalintii, fiidkii ama dhamaadka usbuuca. Mararka qaarkood waxaad isku dari kartaa casharro iyo inaad iskaa wax isku barto (zelfstudie).</p> <p>- Waxaa jira 2 dhabbo oo suurtagal ah: 1) ASO –h waxaad kaliya qaadanaasaa maadooyinka guud ee aratid ama wax-akhriska ah (theoretische vakken). 2) Beroepsgerichte waxbarasho (maadooyin ku jihaysan barasho xirfadeed oo aad ku baraneyso xirfad) + Barnaamijka Tababarka Guud ee Dheeriga ah (Aanvullende Algemene Vorming) (AAV) (maadooyinka guud ee aragtida ama wax-akhriska ah (theoretische) sida Nederlands, xisaab, iwm.). - Qasab kuguma aha inaad qaadato labada koorso isla hal waqti. - Sidoo kale waajib kuguma aha inaad ka qaadato isla hal CVO.</p> <p>-Waxaad ka dooran kartaa liis dheer koorsooyinka ku wajahan shahaadooyinka / koorsooyin ku wajahan xirfadaha https://www.onderwijskiezer.be/v2/volwassen/volw_secundair_studiegebieden2.php</p>
<p>Muddada</p>	<p>- waxay kuxirantahay dhabbahaaga gaar-ka ah ee shaqsiyeed. Haddii aad maalintii oo dhan wax barato iyada oo aan "lagaa dhaafi karin maadooyinka qaarkood", waxaad ku xisaabtami kartaa 2 sano. Waxaa jira barnaamijyo 1 sano ama 1.5 sano ah</p>
<p>Yoolka</p>	<p>- isu diyaarinta tacliinta sare ama shaqo</p>
<p>Kharashka</p>	<p>-wax lacag diiwaangelin ah male AAV iyo ASO -waxa jira kharashaadka agab-ka koorsoada (cursusmateriaal) -khidmadda diiwaangelinta koorsoada tababarka xirfadeed -Mararka qaar waxaad heli kartaa qiimo dhimis ama maba bixinaysid wax kharash ah. Iska weydii shuruudaha. -Waxaad haysataa dhalasho Beljam ah ama sharci baad ku joogtaa Beljam-ka. -Ka dib markaad hesho shahaadadaada waxbarashada dugsiga sare, waxaad ka dalban kartaa lacag-bixin (een premie) dawladda Flemish-ka oo laguugu soo celinayo lacagaha-diiwaangelinta.</p>
<p>Shuruudaha ogolaanshaha</p>	<p>-marka ay tahay ASO iyo AAV laga bilaabo da'da 18 sano ama haddii aad gaarto 18 sano kahor Diseembar 31 ee sanad dugsiyeedka -waxaad taqaanaa Nederlands kugu filan oo aad ku barankartid casharrada. Tan waxaad ku muujineysaa imtixaanka luqadda. -Waxaad haysataa dhalasho Beljam ah ama sharci baad ku joogtaa Beljam-ka. -waxaad kaqeyb qaadanaasaa kulan-warbixin iyo wareysi qaadasho ah (infosessie en een intakegesprek). Waxaad fursad u heli doontaa inaad gasho imtixaannada ah in lagaa dhaafi karo maadooyinka qaarkood.</p>
<p>Shahaadada</p>	<p>Waxaad heleysaa: - warqad-qayb-cadayn u ah (deelcertificaat) haddii aad qayb (module) ku baasto - shahaadada waxbarashada dugsiga sare haddii aad ku gudubto dhammaan qaybaha ASO - Cadaymaha (certificaten) aad ka heshay tababarada AAV iyo koorsooyinka tababarka xirfadaha oo wada socda ayaa ah shahaadada waxbarashada dugsiga sare.</p>
<p>Macluumaad Dheeraad ah</p>	<p>Waxaad ku diyaarin kartaa daraasadan adoo adeegsanaya SOCIAL SCHAKEL plusKLAS (OKAN kadib OKAN). Weydii tababarahaaga dabagalka OKAN wixii macluumaad dheeraad ah.</p> <p>Macluumaadka ku saabsan bariga-Flemish-ka (Oost-Vlaanderen): Eeg su'aasha ah 'Sideen ku helaa shahaadada waxbarashada dugsiga sare iyada oo loo marayo waxbarashada dadka waaweyn' oo ka fiiri bogga internetka ee De Stap- Leerwinkel Oost-Vlaanderen: https://www.destapgent.be/faq/faq_list.php?categorieid=5</p> <p>https://www.destapgent.be/files/kcfinder/files/2019-2020/1911DiplomagerichteTrajectenSchema.pdf</p> <p>Waxaad ka heli kartaa dhammaan fursadaha aad ku heli karto shahaadada waxbarashada dugsiga sare: https://www.onderwijskiezer.be/v2/volwassen/volw_gndiploma.php</p> <p>Shahaadada waxbarashada dugsiga sare (SO) maxay xiiso u yeelan kartaa? Shahaadada SO: - kaa dhigaysaa qof qalin-jabiyay (gekwalificeerd) - shahaada kasta oo waxbarashada dugsiga sare ah oo ka socota ASO, BSO, KSO iyo TSO waxay ku siisaa fursad ah inaad ku gali karto waxbarashada tacliinta sare - waxay kaa caawin karta inaad shaqo hesho; - waxay saameyn ku yeelan kartaa fursadahaaga koboca-booskaaga-shaqada (doorgroeimogelijkheden) iyo mushaharkaaga;</p>

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

	<p>- waxay ku siinayaa inaad hesho shaqo qorista heerka C ee dowladda. Intaas waxaa sii dheer, waa hab lagu hormariyo naftaada.</p>
Caawin	<p>-De Stap -Leerwinkel Oost-Vlaanderen www.destappgent.be</p> <p>- Ma u dhexeysaa 17 ilaa 25 sano? Ma degan tahay, wax ma ka barataa ama ma ka shaqaysaa Gent? Kala xiriir Word Wijs wixii ku saabsan tababbarka xulashada, barashada iyo helitaanka takhasuska ama shahaadada waxbarashada dugsiga sare. Si lacag la'aan ah iyo iyada oo ay ku xirantahay rabitaankaaga oo aan qasab ahayn.</p> <p>Word Wijs, Kleine Raamhof 8, 9000 Gent wordwijs@destappgent.be 0494 93 45 65, 0494 93 45 65, 0485 44 67 03</p>

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

9. Qaadashada shahaadada waxbarashada dugsiga sare iyada oo loo marayo Guddiga Imtixaanka Dugsiga Sare

Nuxurka mawduuca	<ul style="list-style-type: none">- Casharro ma qaadanaysi balse waa inaad iskaa wax u barataa (zelfstandig).- waxaad iskaa usoo urursanaysaa buugaag wax laga barto iyo macluumaad waxtar leh.- Waxaad imtixaanada ku galaysaa Brussels.- Imtixaannada waxay socdaan oo la abaabulaa sanadka oo dhan.- Imtixaanada la soo bandhigaa way xadidanyihiin waxayn u badan yihiin qoraal.- Waxaad iskaa u qorsheyneysaa imtixaanadaada adoo ku saleynaya taariikhaha la heli karo.- sanadka saddexaad ee BSO waxaad sidoo kale caddaynaysaa khibrad-wax-qabad ah (praktijkervaring).- Hadaad rabto inaad kaqaybqaadato, markaa waxaad qaadanaysaa kulan macluumaad qasab ah (khadka tooska ah(online)) oo aad ku baraneyso sida wax walba oo ku saabsan ay u shaqeeyaan.
Muddada	- waxay kuxirantahay dhabbahaaga gaarka ah ee shaqsiyeed
Yoolka	In aad hesho qaraalka-cadaynta (getuigschrift) ama shahaadada waxbarashada dugsiga sare
Kharashka	<ul style="list-style-type: none">- 33 euro halkii daraasad- Adiga ayaa iibsanaaya agab-ka wax-barashada (buugaagta gacanta ...)
Shuruudaha ogolaanshaha	<ul style="list-style-type: none">- Da'daada ama waxbarasho hore muhiim maaha.- Si aad isu diiwaangeliso waxaad u baahan tahay kaar aqoonsi (ama caddeyn kale oo aqoonsi rasmi ah)
Shahaadada	Waxaad heleysaa: <ul style="list-style-type: none">- qoraal-cadayn ah(getuigschrift) oo heerka 1aad ee dugsiga sare ama- qoraal-cadayn ah(getuigschrift) heerka 2aad ee dugsiga sare (ee ASO, BSO, KSO ama TSO) ama- shahaadada waxbarashada dugsiga sare (ee ASO, BSO, KSO ama TSO).
Macluumaad Dheeraad ah	Guddiga Imtixaanka: https://examencommissiesecundaironderwijs.be/ https://www.onderwijskiezer.be/v2/secundair/sec_examencommissie.php
Caawin	<ul style="list-style-type: none">- Ma u dhaxeysaa 17 ilaa 25 sano? Ma degan tahay, wax ma ka barataa ama ma ka shaqaysaa Gent? Kala xiriir Word Wijs wixii ku saabsan tababbarka xulashada, barashada iyo helitaanka takhasuska ama shahaadada waxbarashada dugsiga sare. Si lacag la'aan ah iyo iyada oo ay ku xirantahay rabitaankaaga oo aan qasab ahayn.Word Wijs, Kleine Raamhof 8, 9000 Gent wordwijs@destapgent.be 0494 93 45 65, 0494 93 45 65, 0485 44 67 03- Goobaha-wax-barasho ee Flanders-ka https://onderwijs.vlaanderen.be/nl/leerwinkels

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

10. Tacliinta sare: Koorsooyinka qalin-jabinta.

Nuxurka mawduuca	<p>- Qalin jabintu waxay u dhexeysa waxbarashada dugsiga sare iyo xirfadleyda bachelor-ka.</p> <p>-Waxaad qaadanaysaa tababar badan (veel praktijk) (qiyaastii saddex meelood meel waxbarashadaada).</p> <p>- Waxaad qaadanaysaa casharada iskuulka iyadoo lagu darayo inaad iskaa (zelfstandig) u shaqeyso.</p> <p>- Tababbarka waxaa loo abaabuli karaa fasallo maalinle ah, fiidkii ah ama sabti iyo axad ah.</p> <p>-Waxaad ku qaadan kartaa shahaadada qalinjabinta barnaamijka qaybaha wax-barasho ee soo socda mid ka mid ah: https://www.onderwijskiezer.be/v2/hoger/hoger_graduaatsopleidingen.php</p>
Muddada	<p>- Koorsooyinka waxaa lagu tiriyaa inta udhexeysa 90 iyo 120 dhibco oo wax barasho.</p> <p>-Haddii aad maaintii casharro qaadato, waxay noqonaysaa qiyaastii 2 sano.</p> <p>-Haddii aad qaadato fasallo fiidkii, badanaa waa 3 sano.</p>
Yoolka	<p>- Barnaamijyada wax barasho waxay kuu diyaarinayaan xirfad ama waxbarasho dheeraad ah oo ku saabsan bachelor xirfadeed.</p>
Kharashka	<p>-Haddii aad isqorto jaamacad lagu barto cilmiga farsamada (hogeschool), waxaad bixinaysaa khidmadda isqorista. kharashka waxbarashadani waxay ka kooban tahay qaddar go'an + qaddar kharasha dhibic-wax-barasho kasta oo la qaato.</p> <p>-Haddii dakhligaagu hooseeyo, waxaad xaq u yeelan doontaa kharashka waxbarasho (een studietoelage) ee xaaladaha gaarka ah. Adigu markaa waxaad tahay arday haysta deeq-waxbarasho ama u dhaw inuu haysto deeq-waxbarasho.</p> <p>Macluumaad dheeri ah ka fiiri https://studietoelagen.be/</p> <p>Macluumaadka ku saabsan xaaladdaada gaarka ah ee la xiriirta deeqda waxbarasho, waxaad kala xiriiri kartaa Waaxda Adeegyada Ardayda ee jaamacadda: https://centenvoorstudenten.be/partners/</p>
Shuruudaha ogolaanshaha	<p>- Waxaad haysataa shahaadada waxbarashada dugsiga sare ama qoraalka-cadaynta (getuigschrift) dugsiga sare ee sannadka 6aad (qoraalka-cadaynta (getuigschrift) hore ayey u jirtay 3 sano).</p> <p>- Ka waran haddii aadan haysan shahaadada ama qoraalka-cadaynta (getuigschrift)? Waxaad sameyn kartaa imtixaanka-ogolaanshaha (toelatingsproef).</p> <p>Imtixaanku wuxuu qaadanayaa ugu badnaan 100 daqiiqo wuxuuna ka kooban yahay 4 qaybood:</p> <ul style="list-style-type: none"> - aqoonta erayada, - fahamka akhriska, - xisaab (ku xisaabinta kaalkuleetarka), - sababaynta tirade (ku xisaabinta kaalkuleetarka). <p>Si aad u gudubto waxaad u baahan tahay inaad hesho ugu yaraan boqolkiiba 50 guud ahaan.</p>
Shahaadada	<p>Waxaad heleysaa</p> <ul style="list-style-type: none"> - shahaadada qalin-jabinta ('Associate degree'). <p>-Waxa sidoo kale aad heli kartaa shahaadada waxbarashada dugsiga sare isla waqtigaas haddii loo baahdo. Si tan loo sameeyo, waxaad qaadanaysaa Tababarka Guud ee Dheeriga ah (AAV) ee CVO, ka eeg macluumaadka ku saabsan waxbarashada dadka waaweyn ee sare bogga 9.</p>
Macluumaad dheeraad ah	<p>Macluumaadka ku saabsan barnaamijyada qalin-jabinta(Graduaatsopleidingen) ee Flemish-ka ayaa laga heli karaa Onderwijskiezer</p> <p>https://www.onderwijskiezer.be/v2/hoger/hoger_graduaatsopleidingen.php</p>

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

	<p>Dulmarka guud ee barnaamijyada qalin-jabinta ee Bariga Flemish-ka waxaa laga heli karaa bogagga internetka ee saddexda kuliyadood</p> <ul style="list-style-type: none">• <u>Arteveldehogeschool</u>• <u>Hogeschool Gent</u>• <u>Odisee</u>
Caawin	<p>- De Stap- Leerwinkel Oost-Vlaanderen, info@destappgent.be , 09 233 75 15, bibliotheek De Krook, dabaqa 2aad, Miriam Makebaplein 1, 9000 GENT. www.destappgent.be</p> <p>-IN-Gent vzw , Kongostraat 42, 9000 Gent, 092657840 /website https://www.in-gent.be/voor-jou/onderwijs/zoek-je-eeen-school/voor-jezelf</p>

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

11. Tacliinta Sare: Kalkaalinta Caafimaadka ee HBO5

Mawduuca	<p>- Waxaad qaadanaasaa tababar(praktijk) badan.</p> <p>- Waxaad baraneysaa aragtida ama wax-akhriska (theorie) ee aad u baahan tahay si aad shaqadaada si wanaagsan ugu qabato.</p> <p>- Barnaamijkan qalin-jabintu wuxuu u dhexeeyaa waxbarashada dugsiga sare (SO) iyo bachelor-ka xirfadlaha ah.</p> <p>- Adigu (badanaa) waxaad qaadanaasaa casharo maalinta ah. Dhabbahaaga waad baddali kartaa haddii aad shaqeyneyso.</p> <p>- Waa shahaadada qalin-jabinta, balse waxaad ka qaadanaasaa tababarkan iskuul loogu talagalay waxbarasho waqtiga-buuxa oo dugsi sare ah. Iskuulku wuxuu si wadajir ah ula shaqeyaa jaamacad cilmiga farsamada bixisa.</p> <p>- Waa maxay farqiga u dhexeeya shahaadada koowaad ee bachelor-ka (PBA) ee Kalkaalinta Caafimaadka (eeg faahfaahin dheeraad ah bogga.15)?</p> <ul style="list-style-type: none"> ✓ HBO5 Kalkaalinta Caafimaadka: Dhabada-moodeelku wuxuu soconayaa 3 sano. Waxaad ku qaadaneysaa dugsiga sare. ✓ Barnaamijka Kalkaalinta Caafimaadka ee PBA-da wuxuu leeyahay mudo wax-barasho oo ah 240 dhibco, dhabada-moodeelku waa 4 sano. Waxaad ka qaadanaasaa jaamacadda cilmiga xirfadaha. ✓ Lagaama rabo khidmadda diiwaangelinta HBO5 ee kalkaalinta caafimaadka. ✓ Wax-barashada HBO5 waxay ku jihaysantahay inta badan tababar (praktijgericht) oo lagu jaan-gooyay/habeeyay (op maat) ardayga.
Muddada	<p>- 3 sano wuxuuna ka kooban yahay 5 qaybood (module)</p> <p>- Waxaad bilaabi kartaa 1da Sebtember iyo 1da Febraayo.</p>
Yoolka	<p>- Xirfadda kalkaalinta caafimaadka (Kadib markaad dhammayso qaybaha aasaasiga ah, waxaad markaaba helayaa darajada daryeela caafimaad (zorgkundige))</p> <p>- iyada ooy kuxirantahay waaxda aad ka shaqeysid, waxaad ka shaqayn kartaa isla shaqada asxaab leh shahaadada koowaad (bacheloropleiding). Balse takhasusyada qaarkood ama jagooyinka aad horseed ka tahay waxaa lagu heli karaa oo keliya shahaadada bachelorka.</p> <p>- Waxaad samayn kartaa oo kale inaad ka qaadata jaamacadda cilmiga xirfadaha barnaamij-dheeri ah si aad u hesho shahaadada koowaad ee bachelor.</p>
Kharashka	<p>- Malaha lacag-diiwaangelin ah</p> <p>- Balse waxa la iska rabaa kharashka koorsada sida kharashaadka booqashooyinka daraasadda, iibsiga / kireynta lebiska isbitaalka, iwm.</p>
Shuruudaha Ogolaanshaha	<p>- shahaadada waxbarashada dugsiga sare</p> <p>- ama qoraalka-cadaynta ee heerka 3^{aad} ee BSO (getuigschrift van de 3^{de} graad BSO) (waa inaad 18 sano weli gaarin)</p> <p>- ama cadayta (certificaat) waxbarashada dadka waaweyn ee dugsiga sare (ugu yaraan 900 waqtiyo-waxbarasho)</p> <p>-Miyaadan dhamayn waxbarashada dugsiga sare? Haddii aad ka weyn tahay 18, waxaad weli ku bilaabi kartaa imtxaanka-ogolaanshaha (toelatingsproef) oo ay abaabulaan dugsiyada sare. Dugsigu wuxuu tijaabiya aqoontaada Nederlands-ka iyo xisaabta. Waxaa laga yaabaa inaad qorto qoraal dhiirgalin ah.</p>
Shahaadada	<p>- Waxaad qaadanaasaa shahaadada qalin-jabinta(gegradueerde) kalkaalinta caafimaadka.</p> <p>- Ma haysataa warqadda-cadaynta (attest) ee heerka 2^{aad} ee dugsiga sare (4SO)? Waxaad si toos ah u heleysaa shahaadada waxbarashada dugsiga sare ka dib markaad si guul leh u dhameystirto kalkaalinta caafimaadka ee HBO5.</p> <p>-Ma haysataa qoraalka-cadaynta (getuigschrift) ee 6 BSO oo ugu badnaan afar sano jir ah oo lagu daray cadaynta (certificaat) Tacliinta Guud ee Dheeraadka ah (AAV) ee laga qaato CVO (eeg macluumaadka ku saabsan AAV bogga 11)? Waxaad heleysaa shahaadada waxbarashada dugsiga sare kadib labada qaybood ee aasaasiga ah (kadib 1 sano HBO5). https://www.onderwijskiezer.be/v2/volwassen/volw_gndiploma_plus18.php?age=2&var=verpleegkunde</p> <p>- Eeg shahaadooyinkaaga waxbarasho ee waddankaaga. Waxaa laga yaabaa inaad adeegsan kartid. Ma ka qaadata casharro dugsiga sare Flemish? Warbixinnada (rapporten) hore u sii diyaarso. Waxaad qoraalka-cadaynta (getuigschrift) ee heerka 2^{aad} ee SO (4SO) ka qaadan kartaa sidoo kale adiga u maraya Guddiga Imtxaanka (eeg faahfaahinta bogga 12).</p>
Macluumaad Dheeraad ah	<p>Waxaad ugu diyaar-garoobi kartaa daraasaddan adoo maraya SOCIAL SCHAKEL plusKLAS (OKAN kadib OKAN). Weydii tababarahaaga dabagalka OKAN wixii macluumaad dheeraad ah.</p> <p>Waad ugu diyaar-garoobi kartaa inaad ka qaadata VDAB-da diyaargarawga u faaidaynta bulshada (social profit) ee loogu talagalay dadka aan luuqadda u dhalanin (eeg macluumaadka ku saabsan VDAB bogga 7): bogga interneetka https://www.vdab.be/opleidingen/aanbod/904306/Vooropleiding_social_profit_voor_anderstaligen</p> <p>Kalkaalinta Caafimaadka waa xirfad ciriiri (knelpuntberoep) ah. Waxaad u mari kartaa VDAB oo aad ka qaadankartaa shahaadada HBO5 ee kalkaalinta caafimaadka https://www.vdab.be/zorg.</p> <p>VDAB waxay kaa bixineysaa agabka-waxbarasho. Mararka qaarkood waxaad sidoo kale heleysaa kharash celin, tusaale ahaan kharashka gaadiidka aad fasalka ku aadayso. Waxaad iska diiwaangelineysaa shaqo-raadiye ahaan (werkzoekende).</p> <p>Macluumaad kalkaalinta caafimaad ee HBO5 (HBO5 verpleegkunde): https://www.onderwijskiezer.be/v2/hoger/hoger_hbo_detail.php?richting=70</p>
Caawin	

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

	<p>- De Stap- Leerwinkel Oost-Vlaanderen, info@destappgent.be , 09 233 75 15, bibliotheek De Krook, dabaqa 2aad, Miriam Makebaplein 1, 9000 GENT. www.destappgent.be</p>
--	--

	<p>-IN-Gent vzw , Kongostraat 42, 9000 Gent, 092657840/website https://www.in-gent.be/voor-jou/onderwijs/zoek-je-eeen-school/voor-iezelf</p>
--	--

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

12. Tacliinta sare: Bachelor

Nuxurka mawduuca	<p>- Waxaad kala dooran kartaa bachelor xirfadle ah (professionele bachelor) (PBa) ama bachelor tacliimeed (academische bachelor) (ABa).</p> <p>Waxaad ka qaadanaysaa bachelor xirfadle ah (professionele bachelor) (PBa) jaamacadda cilmiga farsamada (hogeschool). Waxaa ka mid ah: waxbarasho guud oo ballaaran, aqoon takhasus-xirfadeed ah, tababar shaqo / wax-barasho goobta shaqada ah.</p> <p>Waxaad qaadanaysaa bachelor tacliimeed (academische bachelor) (ABa) oo ay ku xigto master (Ma) jaamacad / Iskuulka Farshaxanka. Waxay xoogga saaraan waxbarashada tacliinta ballaaran (aragti) (theoretische) waxbarasho, ku saleysan iyo mid loogu talagalay cilmi baaris ama tababar ku saabsan farshaxanka.</p>
Muddada	<p>-180 dhibco-wax-barasho, dhabbada-moodeelka ah: 3 sano oo waxbarasho waqti-buuxa ah -ka-reeban: kalkaalin caafimaadka: 240 dhibco-wax-barasho = dhabbada-moodeelka ah ee 4 sano oo ah waxbarasho waqti-buuxa ah</p>
Yoolka	<p>- PBa waxaa loogu talagalay toos u adeegsiga-xirfadeed (beroepsuitoefening). Waxaad si toos ah ugu sii gudbi kartaa suuqa shaqada ama waxaad sidoo kale u wareegi kartaa shahaadada mastarka adigoo sii maraya barnaamijka-kalaguurka (schakelprogramma).</p> <p>- ABa waxaa loogu talagalay:</p> <ul style="list-style-type: none"> - u diyaar garawga Master, - cilmi baaris / tababar farshaxan,
Kharashka	<p>- Markaad iska diiwaangelinayso kulliyad ama jaamacad, waxaad bixinaysaa khidmadda diiwaangelinta.</p> <p>- Haddii dakhligaagu hooseeyo, waxaad xaaladaha qaarkood xaq u yeelan doontaa deeqd-waxbarasho (studietoelage). Adigu markaa waxaad tahay arday haysta deeq waxbarasho ama arday u dhow inuu haysto deeq-waxbarasho.</p> <p>Macluumaad dheeraad ah ka fiiri https://studietoelagen.be/</p> <p>Macluumaadka ku saabsan xaaladaada gaarka ah, waxaad la xiriiri kartaa Waaxda Adeegyada Ardayda (STUVO) ee jaamacadda ama kulliyadda. https://centenvoorstudenten.be/partners/</p>
Shuruudaha Ogolaanshaha	<p>-Waad bilaabi kartaa haddii aad haysato shahaadada waxbarashada dugsiga sare (eeg faahfaahinta bogga 11-12). Haddii aadan tan haysan, waxaad sidoo kale ka qaybqaadan kartaa imtixaanka ogolaanshaha (laga bilaabo 21 sano).</p> <p>-Ma haysataa shahaadada dugsiga sare ee dalkaaga? Xaq ma kuu siinaysaa inaad ka bilowdo Jaamacad ku taal dalkaaga? Markaa sidoo kale halkan Flemish-ka ka hirgelin kartaa adoo adeegsanaya hab-raaca ogolaanshaha. Waxaad u baahan tahay nuqul sharciyeysan (gelegaliseerde kopie) oo ah shahaadadaada ama tarjamadda shahaadada oo sharciyaysan (Apostille). Macluumaad dheeraad ah halkan: https://www.ugent.be/nl/opleidingen/bacheloropleidingen/toelating/diploma.htm</p> <p>-Waxa kale oo aad kubilaabi kartaa tacliinta sare shahaadada-qalinjabinta (graduaatsdiploma) (fiiri faahfaahinta bogga 13.14)</p> <p>- Caafimaadka iyo dhakhtarnimda -lka waxa lagu soo galaa imtixaan-ogolaansho (toelatingsexamen) oo qasab ah</p> <p>-Iskuulka farshaxanka waxa la iska rabaa farshaxan tijaabo-ogolaansho (toelatingsproeven) oo qasab ah.</p> <p>-Waxaa jira tijaabo-heerka-aqoonta ah (ijkings) oo qasab ah, imtixaanno-hordhac ah (instaptoetsen) oo laga galayo sayniska injineernimada, daawada xoolaha, dhismaha, koorsooyinka waxbarashada-macalinnimada... Taasi waa in la arko inaad aqoon ku filan oo hore aad ka haysato waxbarashada dugsiga sare oo aad ku guuleysato heerka ogolaanshaha lagaa filayo. Imtixaanadani waa kuwo khasab ah, balse ma aha kuwo lagu go'aan qaadanayo oo lagu go'ayo. Haddii aadan guuleysan, waad bilaabi kartaa, laakiin ogow inay kugu adkaan doonto.</p> <p>-Sida ay u badanyihiin dhammaan koorsooyinka tacliinta sare waxay ku baxaan luuqadda Nederlands-ka. Haddii aadan dhammeystirin sanad dugsiyeedka (ugu dambeeya) ee waxbarashada dugsiga sare, waa inaad haysataa ugu yaraan shahaadada heerka B2 ee luuqadda Nederlands-ka ama aad ku guulaysatay imtixaanka-ogolaanshaha ee dhakhtarka (ilkaha).</p> <p>- Sidoo kale haddii aad rabto inaad wax ku barato luuqadda Ingiriis-ka, waa inaad caddeysaa aqoonta aad u leedahay luuqadda Ingiriiska. Waa inaad haysataa warqas-cadayn ah ugu yaraan heerka B2 ama aad ugu yaraan hal sano si guul leh u dhammaysatay koorso luuqadda Ingiriis-ka aad ku qaadatay. Mar kale ka hubi heerka Ingiriisiga lagaa rabo hay'adaha laftooda!</p>
Shahaadada	<p>- shahaado bachelor xirfadle ah (professionele bachelor) (oo ku wajahan suuqa shaqada) -ama shahaado bachelor tacliimeed (academische bachelor) (oo ku jiheysan dhanka barnaamijka shahaadada mastarka)</p>
Macluumaad Dheeraad ah	<p>Qaab dhismeedka HO https://www.onderwijskiezer.be/v2/hoger/hoger_structuur.php</p> <p>Waxaad ku diyaar garoobi kartaa waxbarasho sare adiga oo qaadanaya sannadka u diyaargarowga ee waxbarashada dugsiga sare. https://www.onderwijskiezer.be/v2/secundair/sec_3graad_vj.php</p> <p>Suurtagalnimada kale ee loogu diyaar garoobayo tacliinta sare waa Dhabbada-Diyaarinta Tacliinta Sare ee dadka ku hadla luuqadaha kale. https://in-gent.be/voor-iou/onderwijs/voortraject-hoger-onderwijs</p>

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

Caawin	<p>- Xarumaha adeegyada Ardayda ee Kulliyadda jaamacadda: kulliyadaha & jaamacadaha https://centenvoorstudenten.be/partners/</p> <p>-De Stap- Leerwinkel Oost-Vlaanderen, info@destappgent.be , 09 233 75 15, bibliotheek De Krook, dabaqa 2aad, Miriam Makebaplein 1, 9000 GENT. www.destappgent.be</p> <p>-IN-Gent vzw , Kongostraat 42, 9000 Gent, 092657840/website https://www.in-gent.be/voor-jou/onderwijs/zoek-je-een-school/voor-jezelf</p>
--------	--

Vertaling Nederlands-Somali.

Dit is de vertaling Somali van "Keuzewijzer voor Okan leerlingen" en bevat identiek dezelfde informatie als de Nederlandse tekst. Deze vertaling mag enkel verspreid worden met de originele brontekst "Keuzewijzer voor Okan leerlingen".

MACLUUMAADKA BUUGGA



Hageha-Xulashada ee ardayda OKAN-ka da'da daweyn 18

IN-Gent vzw oo la kaashanaysa De Stap - Leerwinkel Oost-Vlaanderen

IN-Gent v.z.w.

Kongostraat 42
9000 Gent

T 09 265 78 40

E info@in-gent.be

W www.in-gent.be

Su'aalo/aragtiyo

Ludmila Vysotskaya

Shaqaalaha Gacan-qabadka Da'yarta loo hagayo Wax-barashada

Waaxda Gacan-qabadka Shaqsiga

ludmila.vysotskaya@in-gent.be

Qaabeynta

IN-Gent vzw

Daabacaadda

Mei 2021

Mas'uul-ka daabacaha

Astrid De Bruycker, gudoomiye-ha IN-Gent vzw, Kongostraat 42 9000 Gent